Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-, MAAHANMUUTTO- JA KOTOUTTAMISRAHASTO
Euroopan unionin tuella

# WARAYSIGA MAGANGELYADDOONKA HAGISTA MACMIILKA

Waxaa laguugu yeeray waraysiga magangelyaddoonka ee Waaxda socdaalka. Tilmaanbixintaan waxaa ay kuu sheegeysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga la xiriira waraysiga lagula yeelanaayo. Adiga iyo waalidkaa wada akhriya. Haddii wax uun ka mid ah arrinkaan aad fahmi weyso, waxaad faahfaahin dheeraad ah weydiisataa wakiilka ama shaqaalaha Waaxda socdaalka,

## Waa maxay ujeedada waraysiga?

- Qoyskaaga ayaa magangelyo ka codsaday dalkan Finland. Waaxda socdaalku waxaa ay caddaynaysaa sababaha aad iyaga dartoood magangelyada uga codsanaysaan Finland, iyaga awgoodna aydaan dib ugu laaban karin dalkiinnii.
- Waalidkaa ayaa waxay kuu sheegayaan waraysigooda codsiga magangely-addoonka qaxootinnimada, arrimaha ka dhexeeya kuwooda iyo kuwa qoys-kooda ee ku saabsan codsiga magangelyoddoonka qaxootinimo.
- Ujeedada waraysigaan laga leeyahay waa in adiga lagu siiyo fursad aad ku sheegi karto arrimaha adiga kuu muhiimka ah. Waxaad sheegi kartaa, haddii ay adiga kugu soo dhaceen arrimo xunxun, ama aad wax uun ka baqayso. Waa arrin aad muhiim u ah, in kulaankaan aad ku sheegto dhammaan mac-luumaadka arrimaha aad ogtahay.Arrimaha u sheeg si furan oo aad ku cabbi-rayso erayadaada kuu gaarka ah. Haddii loo baahdana qofka waraysiga qaadaaya ayaa kugu caawinaya qaab su'aalo weydiin ah.

## Waa maxay xuquuqaha aad leedahay iyo waajibaadka ku saaran waraysigaan dhexdiisa?

- Wakiilkaaga ayaa kuu soo raacaaya waraysiga. Sidoo kale waxaa adiga lagu waraysan doonaa wax xoogaa muddo ah, iyadoo aanay kula joogin waalidkaaga.
- Waxaad xaq u leedahay waraysigaan inta uu socdo, inaad qabsato qareen kaa caawiya arrimaha sharciyada.
- Waraysiga waxaa jooga turjubaan, kaasoo ku hadli doona luqaddaada hooyo. Waxaa uu si dhexdhexaad ah kuugu turjumi doonaa dhammaanba wixii lagu sheego waraysiga dhexdiisa. Turjubaanku wuxuu noqon karaa mid goobta waraysigu ka dhacaayo jooga, ama khadka telefoonka ku turjumaaya, ama fiidiyoow ahaan u turjumaaya.
- Qofka waraysiga qaadaaya, turjubaanka, wakiilka iyo qareenkuba waxaa saaran waajibka ah in ay sirta qariyaan, taasoo loola jeedo in aanay u sheegi karin cid kale oo arrinkaan ka baxsan wixii ay ka maqleen waraysiga dhexdiisa, Sidoo kale dukumintiyada adiga kugu saabsan waa kuwo sir ah oo la qarinaayo.
- Runta sheeg. Haddii aadan xusuusan ama aadan garanyn, ha isku dayin in aad jawaabta adigu iska allifato ama iska hindisto, sheeg haddii aadan aqoon ama aadan xusuusan.
- Marka lagu waraysanaayo waxaad sheegtaa macluumaadka aqoonsigaaga shakhsiyadeed (magaca iyo taariikhda dhalashada) ee saxda ah. Haddii aad kagadaal doonayso in aad wax ka beddesho macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed, waxaad arrinkaas awgiis u baahan tahay baasaboor ama caddaynta shakhsiyadeed ee rasmiga ah.
- (wixii ka weyn 15 sano jir) Bixinta macluumaad shakhsiyayeed khalad ah waa dambi sida uu sharcigu dhigaayo.

## Sidee ayaa waraysiga loogu soo diyaargaroobayaa?

- Waraysiga ka hor isla soo akhriya adiga iyo waalidkaaga,  oo u kuurgala tilmaanbixinta iyo qoraallada ay ku siiyeen hawlwdeennada dowladda. Waxaa aad muhiim u ah in aad iska akhriso warbixinta ku saabsan nidaamka Dublin. Haddii aadan heysan qorraallada ku saabsan warbixintaasna, waxaad ka heli kartaa bogagga internetka ee Waaxda socdaalka ee cinwaankiisu yahay: migri.fi/esitteet-ja-julkaisut. Warbixinnadu waxay ku hoos ku jiraan cinwaanka "Turvapaikka ja Dublin-menettely" Nidaamka Dublin iyo magangalyoddoonista.
- Haddii aad doonayso in turjubaanku uu noqdo qof dumar ah ama nin, waxaad arrinkaas u sheegtaa shaqaalaha xerada qaxootiga waqti ka horreeya xilliga

wareysiga. Xerada qaxootiga ayaa codsigaaga waxay u soo gudbin doonaan Waaxda socdaalka (imaagareeshinka).

- Haddii xaaladdaada caafimaad ee jir ahaaneed ama nafsad ahaaneed ay tahay mid saamayn ku yeelan karta waraysiga, waxaad arrinkaas u sheegtaa shaqaalaha xerada qaxootiga. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa haddii aad u oggolaato waxay arrinkaaga kala xiriirayaan Waaxda socdaalka, kahor inta aan waraysigu dhicin.

## Waxyaabaha lagaa doonaayo in aad samayso maalinka waraysiga ee waaxda socdaalka gudaheeda

- Imoow waqti hore goobta waraysiga.
- Marka aad timaaddo xarunta Waaxda socdaalka, waxaa lagugu samayn karaa baaritaan xagga ammaanka ah
- Haddii aad leedahay kaarka xerada qaxootiga, tus waardiyaha Waaxda socdaalka.
- Qolka ku sugitaanka ee waaxda socdaalka waxaa imaan kara oo kaliya dadka-waraysiga loogu yeeray, iyo dadka kale ee hore ballanka ula lahaa Waaxda socdaalka.
- Haddii aad doonayso inuu ku soo raaco qof caawiye ah, wuxuu waraysiga kahor arrinkaas qaab qoraal ah u soo weydiin karaa Waaxda socdaalka. Xaaladaha kale ee arrinkaan ku saabsan qofka waraysiga qaadaya ayaa go'aan ka gaari kara marka waraysiga la bilaabaayo in qofka caawiyaha ah uu ka qaybqaadan karo iyo inkale. Qofka caawiyaha ah ma ahan qareen ama looyar, kamana qayb qaadan karo caddaynta arrimaha laga hadlaayo.
- Qofka waraysiga qaadaaya waa shaqaalaha Waaxda socdaalka.
- Waraysi qaadaha ayaa ka soo kaxaynaya qolka ku sugitaanka.
- Waraysiga waa la duubaayaa. Waxaa intaas dheer oo qolka ku jirta kaamarad wax duubaysa.
- Markii loo baahdo waxaan galaynaa biririf ama nasasho. Noo sheeg haddii aad u baahan tahay in la galo biririf ama nasasho.

## Maxaa dhacaya waraysiga dhexdiisa?

- Marka ugu horraysa qofka waraysiga qaadaaya wuxuu kuu sheegayaa, waxyaabaha la samaynaayo waraysiga dhexdiisa, wuxuuna hubinayaa in aad

fahamtay xuquuqdaada iyo waajibaadka lagugu leeyahay iyo inkale. Haddii aadan waxyaabaha qaarkood fahmin weydii qofka waraysiga qaadaaya. U sheeg haddii aadan fahmin hadalka turjubaanka.

- Waraysi qaadaha ayaa kaa codsanaaya in aad sheegto, sababta aad uga soo carartay dalkaagii hooyo iyo sababta aadan dib ugu laaban karinba. Waxaa intaas dheer in uu isagu ku weydiin karo su'aalo uu ku caddaysanaayo wixii aad u sheegtay ee ku saabsan dhacdooyinka ku soo maray. Si daacadnio leh uga jawaab. Sheeg haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn.
- Qofka waraysiga qaadaya, kombiyuutarka ayuu ku qorayaa waxa lagu sheego waraysiga dhexdiisa. Xusuusqorkii laga sameeyay wixii aad sheegtay ayaa la yiraahdaa qoraalka dukumintiga. Waraysiga dhammaadkiisa ayaa la hubinayaa in waraysi qaaduhu uu si sax ah wax u qoray iyo inkale. Turjubaanka ayaa kuu akhrinaaya dukumintigii, Haddii aad dareento wax khalad ah, waa in aad u sheegto waraysi qaadaha. Sixitaan kaddib qoraalkii waa la soo daabacayaa, dadkii ka qaybta ahaa waraysiga ayaa saxiixaya dukumintigaas. Waxaana lagu siinayaa adiga koobiga dukumintigaas.

## Qaabkee ayay Waaxda socdaalku ku gaartaa go'aanka?

- Iyadoo lagu salaynaayo codsigiinna ayaa waxaa qoyskiinna la siin karaa badbaadada caalamiga ah ama sharciga degganaanshaha dalka.
- Waaxda socdaalku waxaa ay go'aanka ku gaaraysaa macluumaadkii ay waalidkaagu bixiyeen iyo wixii kale ee caddayn ah ee arrinkaan ku saabsan ee la soo bandhigay. Sidoo kale marka arrinkaan la falanqaynaayo, waxaa tixgelinta la siin doonaa wixii aad adigu sheegtay.
- Haddii codsigaaga la diido ama la kansalo, dib ayaa laguu celin karaa waxaana la amri karaa diidmada dal soo gelista ee ku saabsan, soo gelsta dalkaan Finland iyo wadamada uu ka dhexeeyo heshiiska Schngen.
- (wixii ka weyn 15 sano jir) Haddii aad hayso waxyaabo cusub oo asaas u ah codsiga magangalyoddoonka qaxootinnimo kaddib, marka uu go'aanka Waaxda socdaalka ee la xiriira codsigaaga haatan ah uu yahay mid dhaqangal ah, Si dhakhso ah u samee codsi cusub. Waxaa kugu waajib ah in aad haysato wax uun sabab ah, oo sheegeysa sababta aad hore ugu sheegi weyday waxyaabaha cusub ee aad ku salaynayso codsigaaga. Sababtu waa in ay noqotaa, mid aadan adigu awoodin in aad saamayn ku yeelato. Arrinkaa kaddib waxaa ay Waaxda socdaalku qiimayn ku samayn doontaa in ay baaritaan ku samayso codsigaaga cusub iyo inkale.